

# 7 tilmaamo kaa caawinaya inaad dalbatid boos dugsi

Waxaa jira iskuulo badan oo wanaagsan oo ku yaal Cardiff, laakiin boosasku si dhakhso leh ayey u baxaan. Halkan waxaa ku yaal tilmaamo fudud oo kaa caawinaya inaad dalbato boos dugsi.



# 1. Baadh oo wax dheeraad ka ogow

Eeg dugsiyada ku yaal deegaankaaga. Booqo boggoda internetka, fiiri boggoda ee himilooyinka oo akhri warbixinta Estyn. Aad:  
[mylocalschool.gov.wales](http://mylocalschool.gov.wales)

## Weydii booqasho

Inaad maqashay keliya waxa iskuulka ku saabsan - micnaheedu maahan waad ogtahay. Eeg websaydhada dugsiga, akhri warbixinnda - iyo weydii haddii aad soo booqan karto

Waxaan booganay 6  
iskuul maxaa yeelay  
Aabaha wuxuu  
rabay inuu hubiyo  
goobahooda isboorti!



## 2. Ogow deegaankaaga

Hubi dugsiyada ku yaal deegaankaaga. Tag: [cardiff.gov.uk/onlinemaps](http://cardiff.gov.uk/onlinemaps)

Damaanad lagaama qaadayo inaad boos ka hesho dugsiga kuugu dhow laakiin inaad aragtid waa meel fiican oo laga bilaabi karo. Iskuulada qaarkood waa kuwo caan ah, sidaa darteed waxaan hubinaa dadku ku nool yihiiin cinwaanka ay na siiyeen, illaa taariikhda gelitaanka.



### 3. Liis sameey

Waxaan taxay  
dhammaan iskuulada  
aniga ila habboon.



Waxaan rajeyneynaa inaad hesho iskuulka aad dooratay ee koowaad laakiin badanaa taasi macquul ma ahan. Dugsi kastaa wuxuu leeyahay tirada ugu badan ee ay qaadan karaan. **Si taxaddar leh uga fikir xulasho kasta.**

**Fiiro gaar ah:** Boosaska dugsigu si dhakhso leh ayey u buuksamaan, markaa ku qor dhammaan dookhaaga si aad u hubiso inaan ku siin karno xulashadaada ugu sarreeya ee suurtogalka ah.

**Liis garaynta dhammaan dookhaaga bilowga hore aad ayey muhiim u tahay.**

## 4. Wax walba noo sheeg

**Haddii aadan noo sheegin - anaga waxba kama naqaan.** Wuxaan rabnaa ilmahaaga inuu helo meesha ugu fiican ee ugu macquulsan. Wuxaad ku caawin kartaa adiga oo diraya wixii caddeyn ah markii aad dalbaneysid. Noo sheeg haddii ilmahaagu:

- uu leeyahay walaalo iskuulka
- uu leehay baahiyoo waxbarasho oo dheeri
- ah haduu leeyahay baahiyoo caafimaad ama bulsho oo macnaheedu yahay inay u baahan yihii inay dhigtaan hal iskuul oo aysan u baahnay mid kale.

➡ **Noo soo sheeg haddii ay wax isbeddelaan.**



## 5. Dalbo waqtiga loogu talagalay

Waxaa jira taariikhda xiritaanka. Waxaan hubinnaa codsiyada ku yimaada waqtiga ugu horreeya.

**60% ee iskuulada ku yaal Cardiff ayaa buuksama wareegii koowaad.**

### Ha daahin

Haddii aad seegto taariikhda xiritaanka, waxaad tabi doontaa wareega koowaad. Markaa waa inaad soo dejisaa foom oo aad u dirtaa. Taasi waxay qaadaneysaa waqtii dheeri ah waxaana laga yaabaa inaad waydo boos iskuulka aad rabto.



## 6. Ka Codso khadka tooska ah (onleenka)

Aad: [cardiff.gov.uk/schooladmissions](http://cardiff.gov.uk/schooladmissions)

Isku day inaad isticmaasho isla cinwaanka emaylka markasta oo aad nala soo xiriirto. Qaar ka mid ah iskuulada diinta ayaa maareeya goobahooda waxbarasho - markaa ka hubi boggoda internetka si aad u aragto haddii aad u baahan tahay inaad si toos ah ka dalbato iyaga.

### Caawinaad raadi

Haddii aad caawimaad u baahan tahay, la xiriir xarunta:


[cardiff.gov.uk/hubs](http://cardiff.gov.uk/hubs)

Adviceline:

📞 02920 871071

ama na soo wac:

📞 02920 872087



## 7. Nagu soo wargeli

Markaad hesho ogolaansho iskuul ku yaal Cardiff, waxaad u baahan tahay inaad noo sheegto haddii aad rabto booska sida ugu dhakhsaha badan. Waxaa laga yaabaa inaadan helin dookhaaga koowaad, laakiin waxaad ku sii jiri doontaa liiska sugitaankaas.

**Fadlan:** noo sheeg hadaadan rabin meesha si aan qof kale aynu siin karno!



## Waxaad ka qaadan kartaa rafcaan

Haddii aadan ku faraxsanayn in laguu diidey boos, waad ka dacwoon kartaa: [link](#)

Koox (guddi) madax-bannaan, mutadawiciin aan lacag qaadanin ayaa dhageysan doonaa racfaankaaga oo go'aankooduna waa mid waajib ku ah.

## Mahadsanid

Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah halkan: [cardiff.gov.uk/schooladmissions](http://cardiff.gov.uk/schooladmissions)